



# **Waad Mahadsan Tahay, Portland! Codbixiyayaashu Si Aan Loo Kala Harin Ayey Ugu Coddeeyeen Curaarta PPS**

Sida aad ogtahay, horraantii sanadkan Guddida Waxbarashada Dugsiyada Dadwaynaha Portland wuxuu u gudbiyey Curaarta Dugsiga 2020 ee soo jeedinta ah, Cod ku Meelmarinta 26-215, waraaqda codbixinta. 3da Noofambar, codbixiyayaasha Portland si cad ayey u oggolaadeen meelmarintan.

**Waxaanu doonaynaa inaanu halkan mahadnaq ugu gudbino taageerada loo muujiyey ardayda Portland iyo mustaqbalka ifaya ee ardayda iyo shaqaalaha Dugsiyada Dadwaynaha Portland.**

Adiga dartaa, ayey Curaarta Dugsiyada Dadwaynaha Portland 2020 u maalgalin doonaan mashaariicda caafimaadka iyo badbaadada ee dugsiyada degmo dugsiyedka oo dhan, u baddali doonaan buugaagta la akhristo iyo qalabka teknoolojiyadda degmada oo idil, u casriyeyn doonaan Dugsiga Sare ee Jefferson, u bilaabi doonaan qorshaynta Xarunta Sare u Qaadidda Ardayda Madaw, ugu samayn doonaan maalgalin taariikhii ah helitaanka, u dhammaystiri doonaan casriyeynta Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic, oo u sii wadi doonaan nashqadaynta iyo qorshaynta casriyeynta Dugsiyada Sare ee Cleveland iyo Wilson.

**Waxaanu rajaynaynaa inaanu xiriir joogto ah idin la samayno inta aanu kala shaqaynayno bulshada hirgalinta Curaartan.** Sidii curaaraaha dugsiyada horumarinta raasamaalka ee 2012 iyo 2017, [Guddida Isla-Xisaabtanka Curaarta PPS](#) —Koox madaxbannaan oo ah xubno bulshada ah oo la magacaabay —ayaa dib ugu fiirin doona si rubucle ah oo dabagali doona sida lacagta curaarta loo isticmaalo, si xisaabcelin loo siiyo dadwaynaha ilaa dhismuhu ka dhammaystirmayo. Marka laga tago la socoshada shaqadooda, fadlan sii wad inaad nala wadaagto fikradahaaga iyo jawaabcelintaada adigoo iimeyl u diraya [schoolbond@pps.net](mailto:schoolbond@pps.net) amase toos ula xiriiraya xubnaha Guddida Waxbarashada Dugsiyada Dadwaynaha Portland.

Mar labaad waad ku mahadsan tahay taageeradaada joogtada ah ee Dugsiyada Dadwaynaha Portland iyo ugu dhawaan 50,000 ee arday ee aanu u adeegno.